HOWLAHA URURKA BISHA CAS EE SOOMAALIYEED 2017

AASAASKA

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waa urur aadaminimo, madax bannaan oo aan siyaasad shaqo ku laheyn. Waxaa la aasaasay bishii Abriil 1963 waxana lagu sharciyeeyey Xeer Madaxweyne oo tirsigiisu yahay 187 soona baxay sanadkii 1965. Ka dibna waxaa aqoonsadey Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) sanadkii 1969 isla sanadkaasi ayuu xubin ka noqdey Xiriirka Caalamiga ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas (IFRC). Ururka Bisha Cas wuxu leeyahay shabakad baahsan oo ka kooban 19 laamood, 130 laan-hoosaadyo iyo cudud ka kooban 915 shaqaale ah, 8,000 mutadawiciin firfircoon iyo ku dhowaad 20,000 mutadawiciin bulsho oo la abaabuli karo waqtiyada ay jiraan xaalado deg deg ah.

129 xarumo caafimaad oo lagu daweeyey **1,140,311** bukaan

5,227 qof ayaa loo fidiyey adeegyo kala ah u sameynta lugaha macmalka iyo duugidda jirka

13,478 bukaan ayaa wax loogu qabtey Isbitaalka Keysaney

6,366 qof ayaa la siiyey tababarro ku saabsan gargaarka deg degga ah

1,171,614 qof ayaa lagu caawiyey in u diyaar garoobaan, la tacaalaan/ ka soo kabsadaan dhibaatooyinka

41,651 qof ayaa loo fidiyey adeegyo baafin ah

Xarumaha Dhallaanka iyo Hooyada

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waa caafimaad bixiyaha ugu weyn dalka. Wuxu maamulaa **129 xarumood** (75 xarumo rigli ah iyo 52 rugood ee wareega) oo adeeg caafimaad aasaasi iyo howlaha nafaqeeynta u fidiya in ka badan labo milyan qofood oo u badan haween iyo caruur. Sanadkii 2017, waxay xarumuhu cudurro kala duwan ka daaweeyeen **1,140,311 bukaan**.

Isbitaalka Keysaney

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed wuxu maamulaa Isbitaalka Keysaney oo ah isbitaal qalliin oo ku yaala Muqdishu. Sanadkii 2017, qeybta bukaan socodka ee isbitaalka waxaa wax loogu qabtey **10,314 bukaan** iyadoo **3,164 bukaan** isbitaalka la seexiyey.

Maareynta Masiibooyinka iyo Badbaadada Bulshada

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed wuxu caawiyaa bulshooyinka nugul si ay ugu diyaargaroobaan, wax uga qabtaan ulana tacaalaan xaaladaha masiibooyinka. Sanadkii 2017, waxaa la caawiyey **1,171,614 qofood**.

Wacyigelinta

Dhamaan Laamaha Ururka Bisha Cas waxay bixiyaan adeegyo wacyigelin ah si loo horumariyo qiyamka aadaminimo. Sanandkii 2017, dad tiradoodu gaareyso **2,200** ayaa wacyigelin loo sameeyey.

Dhaqancelinta Naafada

Seddex Xarumood ee Dhaqancelinta Naafada oo ku kala yaala Muqdishu, Hargeysa iyo Gaalkacyo. Sanadkii 2017, seddexda xarumood waxay adeegyo kala duwan u fididyeen in ka badan **5,227 qofood**.

Adeegga Gargaarka Deg Deg Ah

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waa ururka ugu weyn ee bixiya adeegga gargaarka deg degga ah. Seddex koox-howleed ayaa waxay hadda ka dhisan yiinn Muqdishu, Gaalkacyo iyo Laas Caanod. Sanadkii 2017, in ka badan **6,366** oo ah xubno bulashada ka socda ayaa la siiyey tababarro ku saabsan xirfadda gargaarka deg degga ah.

Dib- u- Soo Celinta Xiriirka Qoyska

Dhamaan Laamaha Ururka Bisha Cas waxay bixiyaan adeegga baafinta si dib loogu soo celiyo xiriirka qoyaska ku kala lumay colaadaha iyo masiibooyin kale. Sanadkii 2017, tiro gaareysa **41,651** ayaa waxaa loo fidiyey adeegyo kala duwan oo baafin ah.

SI **AAD MUTADAWAC U NOQOTO**, FADLAN BOOQO LAANTA BISHA CAS EE KUUGU DHOW ISNA DIIWAANGELI